

# DIB-U-CUSBOONEYSIINTA MEDICAID

Sannadkii 2020-da Dawladda Dhexe ayaa samaysay shuruuc gaar ah oo joojiysay in goobaha Medicaid loo xiro sababo la xiriiira Safmareenka COVID-19. Shuruucdan ayaa dhowaan isbeddel lagu sameeyay. Gobolka Vermont ayaa hadda bilaabi doonaa geedi-socodka dib-u-cusbooneysiinta Medicaid ee caadiga ah gudaha bisha Abriil. Waad sii haysan doontaa caymiska Medicaid haddii aad weli buuxin karto shuruudaha dakhliga, da'da, iyo degganaanshaha. Haddii aad dib dambe ugu qalmi weydo, caymiskaagu waa la joojin karaa. Haddii ay tani dhacdo, waxaad heli doontaa fursad aad ku saxiixdo noocyada kale ee caymiska. **Xafiiska qareenka daryeelka caafimaadka wuxuu halkan u joogaa inuu ku caawiyo haddii aad qabto su'aalo ama walaacyo ku saabsan geedi-socodka dib-u-cusbooneysiinta Medicaid.**

## Dib-u-cusbooneysiinta Medicaid:

Geedi-socodka dib-u-cusbooneysiinta Medicaid wuxuu bilaabmi doonaa mar kale gudaha bisha Abriil 2023. Vermont Health Connect (VHC) ayaa kuu soo diri doonaan warqadda dib-u-cusbooneysiinta ee lagu codsanayo macluumaadka. Waxay codsan karaan inaad u soo dirto macluumaadka si ay u xaqiijiyaan inaad buuxisay shuruudaha dakhliga, degganaanshaha, iyo da'da si aad ugu sii jirto caymiska Medicaid. Waxaa laga yaabaa inaad bixiso caddaynta dakhliga aad hadda hesho.

Ma samayn doonaan hal mar dhammaan dib-u-cusbooneysiinada Medicaid. Taas beddelkeeda, waxay u soo diri doonaan waraaqaha dib-u-cusbooneysiinta xirmo ahaan 14-ka bilood ee soo socda. Inaad jawaab-celin ka bixiso waraaqahan iyo inaad siiso VHC macluumaadka ay codsadaan waa muhiim.

## Cusbooneysi Macluumaadkaaga Xiriirka:

Waa inaad hubiso inay VHC hayaan cinwaankaaga boostada ee jira, lambarka telefoonka, iyo cinwaanka iimaylka si ay kuugu soo diraan warqadda dib-u-cusbooneysiinta iyo wargelinada kale ee muhiimka ah.

Ka wac lambarka **855-899-9600** ama gal degelka adoo booqanaya **vermonthealthconnect.gov** si aad u xaqiijiso in macluumaadkani yahay midkii ugu dambeeyay.

## Ogeysiiska Dhammaadka Caymiska:

Waad sii haysan doontaa caymiska Medicaid haddii aad weli buuxin karto shuruudaha dakhliga, da'da, iyo degganaanshaha. Balse haddii aadan u qalmin caymiska Medicaid, VHC waa inay kuu soo diraan ogeysiiska dhammaadka caymiska kahor inta uusan macaashkaagu dhammaan. Waa inay ku siiyaan ogeysiis kahor taariikhda dhammaadka caymiska. Caymiska Medicaid ma dhammaan doono ilaa maalinta ugu dambeysa bisha.

## Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah:

Haddii aadan u qalmin caymiska Medicaid oo aadan ku jirin caymiska Medicare, waxaad heli kartaa Muddada Isdiiwaangelinta Gaarka ah si aad iskaga diiwaangeliso qorshaha caymiska caafimaadka adoo u maraya VHC marka caymiskaagu dhammaado. Waxaad heli doontaa **60 maalmood** oo aad caymis iskugu diiwaangeliso kadib marka caymiskaaga Medicaid dhammaado.

Haddii shaqo-bixiyahaagu kuu soo bandhigo caymis, waad iska diiwaangelin kartaa caymiskaas marka caymiskaaga Medicaid dhammaado. Balse waa muhiim inaad si dhakhso leh wax uga qabato. Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah ee caymiska shaqo-bixiyaha waxay ku xaddidnaan kartaa 30 maalmood.

## Medicare:

Wac Xafiiska Qareenka Daryeelka Caafimaadka si aad u hesho talo la gaar yeelay haddii aad haysato caymiska Medicare oo aad qabto su'aalo ku saabsan caymiska Medicaid iyo fursadaha caymis ee kuu furan.

## Na soo wac haddii aad qabto Su'aalo:

Xafiiska Qareenka Daryeelka Caafimaadka waa il xogeed bilaash ah oo qarsoodi ah ee ay heli karaan dadka deggan Vermont ee qaba su'aalo ku saabsan caymiska caafimaadka ama helitaanka daryeelka. Na soo wac haddii aad qabto su'aalo ku saabsan geedi-socodka dib-u-cusbooneysiinta Medicaid ama arrin kasta oo kale oo la xiriirta daryeelka caafimaadka. Waxaad nagala soo xiriiri kartaa Khadkayaga Caawinta lambarka **1-800-917-7787**. Waxaad sidoo kale macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa mareegahayaga ama waxaad codsiga caawimaada ku soo gudbin kartaa onlaynka barta [vtlawhelp.org/health](http://vtlawhelp.org/health).